

# Fahamka Habka Qiimaynta Qaybta 504 Dulmar loogu talagalay waalidiinta

*(Understanding the Section 504 Evaluation Process – Somali Translation)*

Khariidaddan hoose wa dulmar qaybta 504 ee Sharciga Dhaqancelinta ee 1973 (sida badan loo yaqaan qaybta 504). Looma qorshayn inay muujiso dhammaan tallaabooyinka ama faahfaahinta gaarka ah<sup>1</sup>. Waxay muujinaysaa waxa dhacaya wakhtiga ilmaha loo garto qiimaynta ee loo aqoonsado inuu naafo yahay ill'aa inta laga abaabulayo wafajin<sup>2</sup>. Qorshaha iyo dib u qiimaynta xilliyeed. Sharaxaada aag kasta oo lambar leh ayaa raacaya khariidadda.

1. **Waalidiinta ama shaqaalaha dugsiga degmada aya codsada qiimaynta Qaybta 504; ogolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay si loo fuliyo qiimeynta.**

2. **Qiimaynta ayaa go'aamineysa haddii naafadu ay si xad dhaaf ah u xaddidayso hal ama in ka badan oo xarakaadka nolol maalmeedka. Haddii natiijyadu noqoto "maya," markaa ardaygu uma qalmo qaybta 504 qorshaha fududeynta ama waafajinta ah; waalidiintu waxay rafcaan dhegeysi ah ka qaadan karaan degmada dugsiga.**

3. **Haddii natiijyadu noqoto "haa," waxa ardayga maldahaya sharciga 504, waxana la bilaabaya abuurista qorsheynta waafajinta. Ardayga sharcigan maldahayo waxuu xaq u leeyahay, waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo ku habboon (FAPE).**

4. **Marka ardaygu u qalmo, waa in dib loo qiimeeyaa si xilliyeed ah.**

## **Sida nidaamka howshu u shaqeeyo**

1. Waalidiinta, ardayga, ama shaqaalaha dugsiga degmada ayaa codsan kara qiimaynta. Haddii aad codsato qiimayn, samee qoraal ahaan, iskuduwaha Qaybta 504 ee degmada dugsiga iyo sidoo kale maamulaha haddii aad rabto. Ujeedada Qiimaynta wa in la go'aamiyo in ilmahaagu qabo naafo, taas oo xaddidaysa mid ama ka badan xarakaadka hawlaha nololaha ee muhiimka ah. Kuwaas oo u baahan kara in ardeyga

<sup>1</sup> Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Qaybta 504 ka eeg qoraalka "Ardayda Naafada ah & Qaybta 504 ee Sharciga Dhaqancelinta ee 1973" ee [PACER.org/parent/php/PHP-c33.pdf](https://www.pacer.org/parent/php/PHP-c33.pdf).

<sup>2</sup> Waafajintu waa hab-doorin shaqada fasalka ama shuruudaha imtixaanka si looga caawiyo ardayda naafada ah inay helaan waxbarasho oo ay muujiyaan aqoonta, iyada oo aan hoos loo dhigin ama la beddelin heerka shaqada fasalka ama imtixaanka. Tusaalooyin dhowr ah waxaa ka mid noqon kara, iyadoo wakhtiga loo dheereya, oo mashruuca ama howlaha ku dhamaystiraan, noocyada kala duwan ee tignoolajiyada caawinta, iyo goob fasalka u gaar ah la fariisiyo.

waafajin ama fududeyn loo sameeyo. Degmadu way ogolaan karta codsiga qiimeynta, ama diidi karta. Haddii dugsigu diido inuu qiimeeyo, waa inuu waalidiinta siyaa ogaysiis ku saabsan xuquuqaha sharciyeed ee ilaalinta nidaamka, si waalidku u ogaadaan fursadaha ay u leeyihiin inay racfaan ka qaataan go'aanka, ama ay u codsadaan qiimayn ka madax banaan dugsiga. Ogolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay kahor intaan la qaban qiimeynta ugu horeysa.

2. Koox taqasus ah ayaa qiimayn ku ogaaneysa haddii ardaygu u qalmo iyo in kale adeegyada Qaybta 504, oo tixgelinaya meelaynta iyo fursadaha adeegga. Waalidiinta loogama baahna iney xubin ka noqdan kooxda, laakiin madaama ay aqoon u leeyihiin ilmahooda, Xafiiska federaalka ee Xuquuqda Madaniga ah ayaa sheegay in dugsigu uu siiyo fursad ay kaga qaybgalaan shirarka kooxda iyo go'aannada. Haddii ardaygu aanu u qalmin, waalidka waa in la siiyaa sharaxaad ah sababta ay ugu qalmin. Waalidiintu rafcaan ayay ka qaadan karaan go'aanka iyada oo loo marayo shir dhageysi ee degmada.
3. Haddii ardaygu u qalmo, kooxda ayaa marka xigta go'aan ka gaareysa waafajinta ama adeegyada ubadka (kuwaaso lo yaqaan Qorshaha 504). Ardaygu waa inuu helaa waxbarasho u dhiganta tan la siiyo kuwa ardayda aan naafada ahayn. Waafajinta qaarkood waa kuwo jireed, sida ka saarida caqabadaha jireed, ama waqti uu ardeygu ku nasto, ama qalabka muuqaalka caawimo. Waafajinta qaarkood waa waxbarasho waxaana laga yaabaa in lagu bixiyo waxbarasho gaar iyo/ama caawimaado iyo adeegyada la xidhiidha. Tusaalooyinka adeegga la xidhiidha waxaa ka mid ah daaweynta jireed, la-talin, daweynta/adeegyada hadalka ama sixidda hadalka, iyo tababarka shaqaalaha. Ardayda waa in lagu meeleeysa fasalka waxbarashada caadiga ah ilaa ugu badnaan ilaa xad ku haboon ardayga.
4. Qiimaynta xilliyeedka laguma qeexin xeerarka federaalka, laakiin degmooyinka dugsiyadu waxay isticmaali karaan nidaamka waxbarashada gaarka ah (Sharciga Waxbarashada, Shakhsiyadka Naafada ah IDEA) oo ka mid noqon kara hal dariiqo oo lagu gaaro shuruudan. Marka loo eego IDEA, dib-u-qiimaynta waa in la sameeyaa ugu yaraan hal mar saddexdii sanaba. Inkastoo ay jirin waqti xadidan ee qorsha 504 dhacayo, dib-u-qiimaynta xilliyeedku waxay hubinaysaa in baahiyaha ardaygu ay yihiin kuwo si waafi ah wax looga qabanayo. Dib-u-qiimaynta waa in ay dhacdaa ka hor wax isbeddel meeleyn ah, oo ay ka mid yihiin hadii ardeyga la ciqaabo in ka badan 10 maalmood.